Mareegta/Degelka Dharaaro

Qalinka: Boobe Yuusuf Ducaale – cankaabo@hotmail.com ,cankaabo@gmail.com

Waa 6dii Ogos 1984kii. Magaaladu waa Jigjiga iyo Xeradii Ciidammada Itoobiyaanka ee Gaaskii 10aad oo la odhan jiray 'kifladoorka.' Saacaddu waxay ku beegnayd ilaa 4.30kii galabnimo. Waa maalin Isniin ahayd. Madashu waxay ahayd Qolkii lagu qabanayay Shirweynihii 4aad ee SNM. Nuur iyo Naalleeyaba waa loo dhammaa. Marti sharaf dibadaha ka timid ayaa ka qayb-gashay. Waxaan ka sii xusuustaa Mujaahid Maahir oo Addis Ababa uga wakiil ahaa Jabhaddii Dmiuqraaddiga ahayd ee Xoreynta Falastiin (DFLP) ee Naa'if Xawaatma madaxda ka ahaa oo mar mar aanu tilifoonkula xidhiidhi jirnay, dadka sida aadka ah SNM taageerana ahaa. Waxa kale oo goob-joogayaal ka ahaa saaxiibbo kale oo Cadan ka yimid oo kala ahaa: Cali Cabdiraxmaan oo madax ka ahaa Xafiiskii Xoghaynta Jabhadaha Xoreynta Carbeed ee Xisbigii Hantiwadaagga ee Yamantii Koonfureed iyo Najiib oo xafiiska kala shaqayn jiray. Waxa kale oo joogay madaxdii dawladda Itoobiya.

Ergooyinka SNM ee Shirweynahaa fadhiyay ilaa 150 waa ay dhammaayeen marka laga reebo tiro yar oo goob-joogayaal ahayd. Meesha ayaa la seexan jiray, cuntada goobta ayaa naloogu karin jiray oo inta badan dibadba loo ma bixi jirin. Shirweyne aad loo bilay ayuu ahaa. Waxa kale oo nagala qayb galay koox miyuusigga noo tumaysay oo Soomaalida Itoobiya ahayd oo aan u malaynayo in laga keenay magaalada Jinacsani oo aan Jigjiga ka fogayn.

Waa goobtan goobta uu Axmed Maxamed oo 'Genius' loo yaqaannay maansadan Dhayalsi ee ma-hadhada reebtay ka tirinayaa. Galabtaa wuxu xidhnaa suudh bunniya aadna waa uu u faraxsanaa. Waxa kale oo uu galabtaa noo qaaday iyada oo miyuusig loo tumayay hees aan is-idhi waxay ku saabsanayd kalgacal iyo maalmo uu ku sugnaa magaalada Qahira oo aan qudheydu ku soo maray 1982kii.

Nasiib wanaag maansadan Dhayalsi iyo heestaa miyuusigga lahaydba waa ay duuban yihiin maqal ahaan, markaas ayaad dhadhansanaysaa codkii qurxoonaa ee Axmed 'Genius'. Axmed nin yaqaannay baa yaqaannaye wuxu ahaa qof aad u faro badnaa oo hibooyin door ah Ilaahay ku mannaystay. Wuxu ahaa hal-abuur, heesaa, jilaa iyo farsamo-yaqaan. Waxa laga sheekayn jiray xilliyo uu Raadyow yar oo in kooban laga maqlo samaystay oo uu adeegsan jiray. Telefishanka Jabuuti waxa laga helayaa oo ku keydsan heeso uu halkaa ka qaadi jiray 1981kii iyo 1982kiiba oo aan daawan jiray xilliyo aan halkaa ku sugnaa.

Magaca aan ugu wan-qalay Mareegtan ee **DHARAARO** waxa aan ka soo qaatay maansadan Dhayalsi ee Axmed Maxamed oo loo yaqaannay 'Genius', iyada oo halkudhegga heestan ee hal-qabsiga noqday yahay: **Dharaaraa na soo maray.**

Mareegta oo keliya ma aha e', hore waxa aan u go'aansaday in aan ugu wan-qalo Buug aan is-leeyahay ku ururi taariikhdii SNM. Wan-qashan waxa aan ku maamuusayaa Axmed 'Genius' iyo shuhadadii SNM ee naftooda u sadqeysay madax-bannaanidii dalkooda iyo dadkooda. Mareegtani ma noqon doonto mid aan leeyahay, bal se waa mid aan u ballaysimay si aynu u wada yeelanno oo wixii mudan in dadka la gaadhsiiyo ama loo keydiyo aynu ku wadaagno. Mareegtu dhadhan iyo dheecaan midna yeelan meyso haddii keligay la igu eego.

Maxaan uga gol leeyahay mareegtan wan-qasheeda iyo hanashadeedaba?

Sababo badan oo aanan halkan ku soo wada koobi karayn ayaa igu kallifay in aan Mareegtan u furo gaar ahaan barbaarta Somaliland, guud ahaanna barbaarta Soomaaliyeed meel ay joogaanba. Malahayga ku murmi meyno in ay tahay waajib qof kasta oo dareen solayba saaran in uu wixii uu dadka ku dhaamo ama awoodi karayaba u gudbiyo.

Waxaan Mareegtan u holladay in aan:

1. In aan ku soo gudbiyo wixii macluumaad ah ee daarran dadka Somaliland iyo Soomaaliyeedba,

2. In aan ku soo gudbiyo taariikh ahaan wixii macluumaad ee SNM ku saabsan oo aan ku soo qaatay muddooyinkii noloshayda ugu adkaa,
3. In aan ku dhiirrinno hal-abuurka da'da yar ee curinta leh ee tix iyo tiraabba qalinkooda u adeegsan kara,
4. In aan wacyi-gelin guud oo nolosha inteeda badan daarran siinno dadweynaha gaar ahaan da' yarta,
5. In aanu keydinno wixii mudan in la keydiyo ama la dhowraba si looga faa'daysto mustaqbalka,

Waxaan idin leeyahay: "Waa aan idiin bilaabaye, ha igaga bixina." Anigana dedaal i faran.

Maansadii Dhayalsina waa tan ee bal durduurta:

Marna dhalanka geedaha,
Carfi kama dhammaadee,
Dhulka oo barwaaqo ah,
Markaad hiirta dhagida ah,
dhex marayso kaymaha,
Laydha kugu dhacaysiyo,
dhirtu wada udgoonaa,
Oo ubax dhalaaliyo,
Dharab subax ma waydee,
Dhafaruurta midhaha leh,

Shinnidii dhadhamisaba,
Dhabaqu u macaanaa,

Anigaa se dhaayaha,
Kaga dhereg lahaa qurux,
Dhaadatoo xusuus lehe,
Waa dharaare ila soco,
Hadba dhamal hadh weyn iyo,
Halkaan dhinaca saarana,
Waa dhufayse ila qodo,

Taasi waxay ka dhigan tahay,
Waa habeenno dhiilladu,
Ka dhexayso aadmiga,
dhulkayaga u hoydoo,
Dhoobadii Hargeysiyo,
Dhubbatiyo Nugaaliyo,
Ilaa dheeggi Waamay,
Taxan tahay dhibaatadu,

(Sacab)

Waa habeenno dhiilladu,
Ka dhexayso aadmiga,
Dhulkayaga u hoydoo,
Dhiito-cabka leebkiyo,
Dhuunta qorigu way wehel,
Dhanka kalena maansada,
Bal in ay Dhimbiiloow,
Halka looga soo dhacay,
Soomaali dhugataan,
Dhayalsiga u diidoon,
Dhalliisheeda hoosiyo,
Dhaawaceeda halista ah,
Farta ugu dhoweeyoon,
Dhiirri-gelinta heesaha,
Dhawaqa ugu baahshee,
Intay dheystu dihin tahay,
Dhegaha i ammaanee,

Taasi waa ma-dhaqatada,
Taasi waa ma-dheregtada,
Taasi waa ma-dhigatada,
Taasi waa ma-dhooyada,
Ii dhereran meesheen,
Ka dhaqaaji leeyahay,

(Sacab)

Goormaa la dhuuxaa,
Hadal dhaayo leeyahay?
Goormaa nin dhiidhiyay
Dhagar-qabe la doodaa?
Goormaa la dhuuntaa?
Goormaa la dhaqan yahay?
Goormaa la dhaafaa,
Laga dhego-adaygaa,
Oo ay dhunkaaliyo,
Xabbad dhacaysa noqotaa?
Goormaa dhibaatada
Dheef lagu xasuustaa?

Waa habeenno dhiilladu,
Ka dhexayso aadmiga,
Dhulkayaga u hoydoo,
Waxay dhudi xalay tidhi,
Mar ay dhaan cawayskii,
Ka furaysay dhoomaha,
Dheeha dheeha geel dhaha,
Oo ka jira dhibaatada,
Ama Garo ku dhaashada,
Dhitadeeda subagga ah,
Ama dhaada weylaha,
Saca Dhiin la weyraxa,
Ama kaba dhaqaaqdee,
Ha ku dhaadan xooluu,
Dhulkayagu lahaan jiray,

Marti dhowrsan baa timid,
Gubadkay ku dhalatoo,
Dhuumashaa habeennadan,
Beesha lagu dhex marayaa,
Dharkayagu ma sheeggana,

(sacab)

Dhawaqiyo af garashadu,
Maaha dhab iyo laalays,
Hubsahsaase ugu dhiman,
Dhudi nimankan waaweyn,
Soo dhowaatay waa tani,
Dhuganaysa baallaha,

Weli sida dharaartay,
Dhaayahawgu taallaa,
Iyadoo ka dheer dumar,
Dhexda gacan la hibatoo,
Dhabannada mid saartee,
Yaa dhacanta naga roga?

Dheglay baan su'aaloo,
Waxan idhi dhanaan iyo,
Dhay midkaydin haysaan?

Waxay tidhi dhib mooyee,
Dheef ma laha duunyadu,
Dhaqashana cidlo u degay,
Mooyi dheysti xoolaha,
Wax dhufsaday ayaamahan,
Gu'gan neefafkii dhalay,
Ibo dhiiqa loo diid,
Laga waa dhanaankiyo,
Caanihii la dhami jiray,
Dhiilkayagu ma buuxsamo,
Haddii tooda dhicisiyo,
Dhammi laysku soo daro,
(Sacab)

Hadday dhaxanti jiilaal,
Soo dhacdaye ma nabad baa?

Waxan idhi dhaqaaliyo,
Ha ka baqanin dhururida,
Ha na moodin dhuurtiyo,
Nimankii wax dhici jiray,
Waxad dheriga saartiyo,
Maxaad dhuuni haysaa?

Waxay tidhi dherow ba'ay,
Miyaa laba dhardhaaraa,
Sidii Faqash dhulka u yimid?

(Sacab)

Ka dhab maaha dayradu,
Waase dhaqan ay leedahay,
Dhawaqiyo hubsiimada,
Iyo dhego adayguye,
Hadday tidhi bal soo dhaaf,

Ma dhantiin Hadraawoow,
Ha la sii dhadhamiyee,
Waayahee maxaa dhiman?

Waa habeenno dhiilladu,
Ka dhexayso aadmiga,
Dhulkayaga u hoydoo,
Waxa taarka soo dhacay,
Dhamacow na leeyahay,
Dhaqdhaqaaqi cadowgaan,
Dhaayaha ku haynnaa,

Waa habeenno dhiilladu,
Ka dhexayso aadmiga,
Dhulkayaga u hoydoo,
Dharaarayna soo maray,
Shantoo dhaban la saariyo,
Ku ekayd dhibaatadu,
Inta dhagar la gaystiyo,
Waxa dhacay ma maqasheen,

Dharaarayna soo maray,
Labadii is-dhugataba,
Mid kaloo dhex taagani,
Oday!!!Meeshu waa dhir nabadee,
Ka dhaqaaqa odhan jiray,

(Sacab)

Inta badanna waa dhaxal,
Taariikhdu dhigaysee,
Dharaarayna soo maray,
Ma dhisnaa la odhan jiray,
Dawladdani mid dhaantiyo,
Dhaqdhaqaaq la jecel yahay,

La soo dhaafyoo waa nabad,
Sheekadii ahayd dheeg,
Wallee laguma soo dhaco,

Waa dharaaro yaabloon,
Ka dhammaan agtaydiyo,
Dhacdo waayheeedaba,
Nin kastoo dhadhamiyaa,
Dhabannada la haystee,
Dhowdhowdu yaa yidhi,

Uma dhicin Cadduur weli?

Sowtan dhabaqday xaajee,
Habaqluhu is-dhaarsaday,

Sowtani nin dhoofoo,
Dhayal kaga maqnaa iyo,
Nin ilaa dhiskeedii,
Dheg-xumadu damqaysiyo,
Dhowaan-xoolowgii shalay,
Dhadhamada sad moodiyo,
Dheddigiyo carruurtiyo,
Kuba waday dhallaankiyo,
Dhallintu is-afgaratee,
Dhawaqoodu siman yahay,

Sowtan dhiirranee ugub,
Sowtani dhafoor-godan,
Soo dhigatay Yaasiin,
Sowtani ka dheer nabad,
Sowtani u dhow halis,

(Axmed halkan waxa uu raacinayaa oo odhanayaa: “Alla ha u sahlo”.

Dhulba waxa leh kii hee,
Ku dhashee ku dhaatoo,
Dhulba waxa leh kii hee,
Ku dhaqmee ilaashoo,
Dhulba waxa leh ruuxii,
Dhisayee la jecel yahay,
Dhulba waxa leh ruuxii,
Dhaxalkiisa yeeshoo,
Dhulba waxa leh kii hee,
Dhimashada ku aamina,

(Sacab)

Aniguna dhulkaygoow,
Waxan dhaxanta jiilaal,
Dhudhubbada cidhiidhiga,
Dhedo saaran buuraha,
Dhadhaabta u cuskanayaa,
Waxan bacad dharaareed,
Sida bahal dhabbacashada,
Intaa aan dhufayskiyo,
Dhirtaada u hadhsanayaa,

Waa guul ad dhaliside,
Allow anan horteed dhiman,
Iyadoon dhammays noqon,

(Sacab)

Intay dhibibidee hore,
Intay dhididday ee kale,
Intay dhaqan xumaatiyo,
Intay dhacantay Maandeeq,
Midna kuma dhadhabayee,
Yay dhalliili doonaan,
Hadday dhama'do caawana?

Ma Dhurwaa i haystaan,
Ku beddeli Dhurwaa kale?

(Sacab iyo sawaxan ayaa is-qabsanaya, markaas ayuu Axmed odhanayaa: "Salaamaad".)

Mise aniga dhiil-xoor,
Igamaba dhammaadoo,
Marka Dhahar la waayaba,
Dhiqlaa soo beddeli jiray?

Beeshayaduna Dhaantada,
Dhaqan bay u leedee,
Allow anu ku soo dhicin,
Mid kaloo dhabqinayaa,

Ma durbaa rag dhaatoo,
Canbe dhoorka loo fidhay,
Isku dhoobadhoobee,
Is-dhex-geli ammuuraha,
Isku dhaash dhir iyo qoosh,
Weligaa dab iyo dhagax,
Isku soo dhoweeyoo,
Dhirta udub la doon-doon
Dhud ah oo xariiriyo,
Is-ma laha ku dhiico leh,
Dhaqso ugu juqaashuye,
Waa sidee Dhimbiilow,
In ay kala dhaqaaqday,
Ku dhowaatay caawee,
Dhowrkan jilib ee loo shiray?

Dhubuq-dhubuq horaan beri,
Dhabannada la haystee,
Dhamacow bal faallee,
Dhulkii waxan la tegaynoo,
Dhaqankeennu see yahay?
Soo dhowaa illowshuhu,
Ma anaa dhug-laawe ah?

Dhallintii Hargeysiyo,
Maye dhaayahaygiyo,
Dhamacow barbaartii?
Waa su'aal dhex-taalee,
Inta dhaawaceen qabo,
Midna aniga oon dhayin,
Miyaan hadal ku dhaafaa.

(Axmed, naxariistii Janno llaahay ha ka waraabiyo e', wuxu maansadan ku soo xidhayaa: "Jawaabtu waa maya, waa aad mahadsan tihiin".)